

Ma doonaysaa in aad ku noolaato guri ama [apartment] adiga kuu gooni ah, ee ah hoy ama guri dad yar la la wadaagayo? Ikhtiyaarka adiga ayaa iska leh, oo haddii aad doonaysid in aad u guurto guri, oo adeegyada xaafadda dhexdeeda aad ka helo, nala soo xiriir oo waxaan kaali hadli karnaa dalabyada adiga kuu furan.


Barnaamijka The *Open Doors* waxay dadka ay ka caawiyaan dhismooyinka duqowda, sida guriga dadka wa weyn lagu xanaaneeyo iyo xarumaha daryeelka ee dhexdhexaadka, oo aad u guurto guryo xaafadda ku dhexyaala. Barnaamijkan wuxuu gobollada ka caawiyaa in ay ka soo tagaan meelaha muddada-dheer lagu noolaado ee laga bixiyo adeegyada daryeelka ee Medikayda oo loo guuriyo oo ay ku noolaadaan jaaliyadda dhexdeeda.

Iyada oo loo marao Xarumaheena Wareejinta iyo Barnaamijka Gaarsiinta Dadka kale iyo Barnaamijka Xigashada, waxaan kaala shaqayn doonaa in



MA DOONAYSAA
IN AAD U GUURTO
JAALIYADDA DHEXDEEDA?

Waan kaa caawin karnaa



www.ilny.org | 518.465.4650



Dokumentigan waxaa la soo saaray iyadoo deeq aan ka helnay CFDA 93.791 deeqdaasoo ay ka timid Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadannaha ee Maraykanka, Xarumaha Adeegyada Caymiska Caafimaadka ee (Medicare) iyo Medikayda. Hase-yeeshee, qoraal-ladan ma ahan mid matalaya sharciga u yaala Waaxda Adeegyada Aadannaha Iyo Caafimaadka, oo waa in aadan u qaadan in ay yihiin kuwa ka yimid dowladda federaalka.



Xarunta Wareejinta waxay dadka ku nool guryaha dadka wa weyn lagu xanaaneeyo iyo xarumaha daryeelka dhex dhexaadka si ay u helaan guri iyo adeegyo jaaliyadda ku salaysan. Tan waxaa ka mid ah in lagu siiyo xog ku saabsan adeegyada iyo taageerrada laga heli karo halka aad ku nooshahay. Waxaa jira Takhasuslayaasha gaarka ah ee ku Wareejinta Xarumaha Sida Madaxbanaan loogu Noolaado ee dhammaan Degmooyinka Gobolka New York.

Takhasuslayaasha Gaarka ah ee Wareejinta ayaa adiga iyo/ama xubnaha qoyskaaga si loo iclaamiyo adeegyada aad u baahan doonto oo kaa caawin doona sida aad ku heli la'hayd adeegyada. Adeegyadan waxaa ka mid noqon kara:

- Diyaarsinaanta Jaaliyadda Waxbarasho, in la hubo in aad haysato xogta iyo xirfaddaha aad u baahan tahay mar haddii aad jaaliyadda ku noqonto.
- In la cayimo adeegyada gaarka ah si loo buuxiyo baahida shaqsi.
- Helitaanka huryo la awoodi karo, la heli karo ee baahidaada buuxiya.

Shaqaalaha khibrada u ah wareejinta waxay kaa caawinnayaan in ay kula dejiyaan qorshe buuxin doona baahidaada oo kaa caawin doona in si guul le aad ugu guurto xaafadda jaaliyadda.

Si wax badan oo ku saabsan barnaamijkan aad uga ogaato ama si aad u waydiiso in jaaliyadda dhexdeeda aad u guurto. Barnaamijka Open Doors waxad kala soo xiriiri kartaa 1.844.545.7108, ama www.ilny.org.



Barnaamijka Albaabada Furan [Open Doors Peer Program] waa koox dad oo horey ugu noolaan jiray guryaha dadka duqowda ay degan yihiin oo ka dibna guryaha caadiga ah iyomeelaha dadka ay degan yihiin u guray, ku waas oo helay adeegyo iyo taageero ka helaaayay halka ay degan yihiin. Shaqaalaha oo kula booqanaya guraha dadka duqoqda iyo xarumaha barbaarinta si ay qibradahooda ay ula wadaagaan dadka degan oo la taageero dadka doonaya in ay jaaliyadda dhexdeeda u guuraan.

Assaaga ayaa kaala shaqayn doona si wax lagaaga qabto dalabyada aad heli karto ee nolashaada saamayn kara, sida:

- Haddii sideedaba la guurayo.
- Halka lagu noolaanayo.
- Adeegga kuwa bixinnaya, oo ay ku jiraan adeegga shaqaalaha tooska.
- Goorta iyo waxa la cunayo.
- Waxa la xirannayo.
- Wicitaanka ama booqashada qoyska iyo asxaabta.
- Goob lagu cibaadaysto
- Meel lagala socdo heer-kulka.
- Madadaalada.
- Waxa qarsoodiga kuu ah iyo ammanka waxyaabaha adiga aad iska leedahay.
- Goorta la qubaysto iyo/ama maydhasho.
- Goorta aad doonayso aad hurdi karto iyada oo aan wax qashqashaad ah aanu jirin.
- Qof guriga kula wadaaga waa haddii aad rabto qof guriga kula wadaaga.

Dhammaan shaqaalaha waxay dhammaystaan tabbarro rasmi ah oo waxaa shaqaalaysiiya Xarumo Degnaansho Isku Filan Waxaa jooga shaqaale ku filan oo ku caawinnaya oo wada jooga dhammaan degmooyinka gobolka oo dhan ku baahsan. Qoyska asaaggaa ah ayaa sidoo kale jooga oo xubnaha qoyska kala shaqayn doona wixii wel wel ah ee ay qabaan ee ku saabsan guuritaanka.

Si wax badan oo ku saabsan barnaamijkan aad uga ogaato ama si aad u waydiisato adeegyada assaaga, barnaamijka Open Doors kala soo xiriiri 1.844.545.7108, ama www.ilny.org.